



**Xarunta Caafimaadka Sharciga ah ee Ganacsiyada
Yaryar iyo Ururada Khayriga ah ee waajahaaya
COVID-19
("Xarunta Caafimaadka
Sharciga ah ee Covid-
19")**

Maxay tahay xaruntaani?

- Communities Rise waxay bixinaysaa xarunah Caafimaadka sharciga ah oo bilaash ah kaasoo siinaaya ganacsiyada yaryar iyo ururada khayriga ah talo bixin sharci oo 60 daqiiqo ah oo uu siinaayo garyaqaan si loogala hadlo su'aalaha sharciyada ganacsiga ama arimaha yimaada sabab la xariirta saamaynta COVID-19 ku yeeshay ganacsiyada.
- Balamaha xarunta ayaa lagu qaban doonaa khadka taleefanka ama shir fiidiyow ah xili uu macmiilku firaaqo leeyahay.
- Turjumaada ayaa lagu bixinayaa wax ka badan 100 luuqadood.

Waa kuwee macaamiisha u qalma?

- *Ganacsiyada Yaryar*
 - § Ganacsiyada Ka shaqeeya Gobalka Washington
 - § 50 shaqaale ah ama ka yar
 - § Ganacsiga ayaa waajahay caqabado sabab la xariirta cudurka Covid-19
- *Ururada khayriga ah*
 - § Ururada khayriga ah ee gobalka WA
 - § 50 shaqaale ah ama ka yar
 - § 501(c)(3) ururada loo sameeyay Canshuur dhaafka ama ururada dhaqaale ahaan la taageero

Waa maxay mawduucyada sharciga ee macaamiisha lagala talin karo?

- Barnaamijyada daynta/deeqda ee federaalka (Sharciga CARES iyo Sharciga Gurmada Degdega ah ee Qoysaska uu saameeyay Korona Fayrasku)
- Su'aalaha guud ee shaqada (maqnaanshaha, fasaxyada, shaqo ka cayrinta, iwm.)
- Kirooyinka ganacsi (isbadalada heshiiska kirada/joojinta heshiiska kirada)
- Caymiska iyo khatarta
- Qandaraasyada (fulin la'aanta, isbadalada, iwm.)
- Dalaafida ganacsiga, xiritaanka ganacsiga, kala dirida shaqaalaha
- Sharciga khayriyaadka iyo xeerarka IRS ee ururada canshuur dhaafka loo sameeyay
- Xaaladaha guud ee ganacsiga ee ka dhashay aafada COVID-19



Sidee ayay u shaqaysaa?

- Macaamiisha ayaa codsan kara balanta xarunta ayadoo adeegsanaaya Foomka Qorista Macaamiisha ee oonleenka ah oo ku jira communities- rise.org: <https://communities-rise.org/covid-19-resources/legal-inquiry/>
- Foomka Qaadashada Macaamiisha ee oonleenka ah wuxuu ku qoran yahay Af Ingiriisi. Foomamka qorista ee oonleenka ah waxaa lagu heli doonaa Af Jayniis iyo Isbaanish dhawaan.
- Communities Rise waxay diirada saaraysaa iskuxirka, iyo fulinta ku baahida, bulshooyinka aan cadaanka ahayn ee madoowga, dadka asalka ah iyo bulshooyinka kale ee la faquuqo
- Adeegyada turjumaada taleefanka ayaa la heli karaa, marka la codsado.
- Waxaan diyaarin doonaa qareen mutadawac ah kaasoo khibrad u leh aaga sharciga ee aad codsanayso in lagaa caawiyo qareenka mutadawaca ah ayaana kulasoo xariiraaya si aad u qabsataan waqti aad fursad leedahay ood ku wada hadashaan taleefanka ama kullaan Fiidiyow ah.

Ogoow: Ururada khayriga ah ayaa sidoo kale ka faa'iidayaan kara inay la xariiraan adeegyada kale dhisida awooda ururka ee ay bixiso Communities Rise oo dheeraad ku ah qaybta caafimaadka sharciga ah. Adeegyada kale ee dhisida awooda waxaa ku jira taageerada qorista deeqda iyo deeq aruurinta oo ay bixinayaan xarunteena deeq qorista iyo xarunteena deeq aruurinta.

Sidee ayaan ula xariiri karaa Communities Rise si aan u helo adeegyada sharciga iyo awood dhisida?

Ganacsiyada iyo Ururada Khayriga ah:

Codso **Xarunta Sharciga ee COVID-19**: <https://communities-rise.org/covid-19-resources/legal-inquiry/>

Kaliya Ururada Khayriga ah:

Codso COVID-19 **Taageerada Awood Dhisida**: <https://communities-rise.org/covid-19-resources/covid-support/>

Nagalasoo xariir:

Saalaha laxariira baahiyaha guseeya COVID-19 : Covidsupport@communities-rise.org

Caawimaad aan Qusayn-COVID-19 : Contact@communities-rise.org

Taleefoonka: 206-324-5850

Webseetka: communities-rise.org

Ilaha COVID-19: <https://communities-rise.org/covid-19-resources/>

Muuqaalada Tilmaamaha Codsiga Daynta EIDL iyo PPP iyo codsiyada tusaalaha ah ayaa ku jira webseetka.